



# Booqashadii Baarlamaanka Minnesota

## Proff, Maxamed Cumar Dalxa oo Booqdey Aqalka Baarlamaanka Minnesota

Gudoomiyaha koowaad ee Baarlamaanka Soomaaliya ayaa waxa lagu casuumey aqalka weyn ee labada gole ee Baarlamaanka Minnesota. Xafladaas ayaa waxa soo qaban qaabiyey Somali Media, Abdimalik Askar.

Prof. Mohamed Cumar Dalxa, ayaa la kulmey madaxda sare ee labada xisbi Dimoqoraadiga iyo Rebooblikaanka isla markaasna ay warbixin kooban ka siiyeen habka uu u shaqeeyo Baarlamaanka Minnesota iyo intii uu soo jirey, ka bacdina ay ku soo wareejiyeen gudaha Baarlamaanka.

Xafladaas oo ay ka soo qayb galeen ururka caanka ah ee Somali Women Civil War Survivals oo ay madax ka tahay Dr Luul Xasan. Ururkan oo ah urur u soo halagamey Dowlada Federaalka sidii ay u hirgeli lahayd.

Gebogabadii ayaa Abdimalik Askar waxa uu u soo jeediyey madaxdii ka socotey Baarlamaanka Minnesota in ay ku caawiyaan Baarlamaanka Soomaaliya sidii ay u siin lahaayeen Training (waxbarasho) una sameyn lahaayeen wada xiriir jooqta ah. Halkaas oo ay madaxdii Baarlamaanka Minnesota u riyaaqeen fikradii loo soo jeediyey.







Contact Information  
Somali Media  
Abdimalik Askar  
Aabdimalik@hotmail.com